

## Maxay tahay in aad filato marka aad la shaqeeyneysa OCHE?

Kooxdeena waxay isticmaashaa “Hab-raaca OCHE” si shaqadooda uu u hago. Hab-raaca OCHE wuxuu ogolaanayaa in kirayste walba si shaqsi ah loola dhaqmo, sababtoo ah qof walba xaaladiisa waa gooni.

Hab-raaca OCHE waxaa ku jira:

- Diridda fariimo wanaagsan
- Howlgelinta iyo Awood-siinta Kiraystayaasha
- Isticmaalidda Qorshooyin Dabacsan oo Halabuurimo leh
- In la siiyo Kiraystayaasha Xogaha
- In Diiradda-lagu-hayo Waxqabasho iyo Shaqaaleyn Xoogan
- Wax-ka-qabashada Arrimaha Salka Hoose ah
- Helidda Lacago Dibadda ah
- Kordhinta Barashada-aasaaska ah ee Maaliyadda
- Ka-qeybgelinta Qoysaska Kaalmeynta
- Gelidda Heshiisyo Dib-u-bixin-lacageed oo Macquul ah



Kuwa taagan bidix ilaa midig: Trevor, Keishia, Sandy, Deneen, Laura, Alexandra iyo Glenn.

Kuwa fadhiya bidix ilaa midig: Cynthia iyo Melanie.

## Waxaan rajeyneynaa in aan kula kulano...

Haddii aad leedahay wax su'aalo ah oo loogu talagalay OCHE fadlan nala soo xiriir, ama xog dheeraad ah ka hel website-keena!



### GOOBTA

339 Bloor Street West, Suite 221,  
Toronto, ON M5S 1W7  
(Gelitaanka Dadka Curyaanimada leh waa  
341 Bloor Street West)

### TALEEFAN

(Phone) 416.632.7999  
(Fax) 416.217.0335

### WEBSITE

[www.oche.ca](http://www.oche.ca)  
[info@oche.ca](mailto:info@oche.ca)



## Xafiiska U-qaabilsanaha Cadaaladda Guryaha (OCHE)



**HUFNAAN • DHEXDHEXAADNIMO • MADAX-BANAANI**

## Waa qofma U-qaabilsanaha Caddaaladda Guryaha?



Cynthia Summers waxay hogaamisaa koox dad mihinado leh ah oo khibrad u leh arrimaha sharciga, shaqada bulshada, caafimaadka maskaxda, xalinta khilaafaadka iyo guryaha bulshada. Kooxda waxay ka wada shaqeynayaan sidii loo gaari lahaa hadafka ah ka-hortegidda guri-ka-saaridda.

Cynthia, oo ah shaqaale bulsho oo diiwangashan, waxay leedahay aqoon iyo xirfado baahsan oo ah la shaqeynta iyo u shaqeynta dadka halista ku jira, oo aay ku jiraan dadka da'da ah, dadka leh dhibaato caafimaadka jirka iyo maskaxda, dadka dakhliga hoose leh iyo soo-galootiga ku cusub Kanada. Waayoaragnimadeeda waxaa ku jira in ka badan 15 sanno oo ah dhinaca sharciga maamulka iyadoo dowladda federaalka aay u magacowday Guddoonka Soogalootiga iyo Qaxootiga ee Kanada (IRB) iyo dowladda Ontario oo u magacowday in aay u adeegto Xubin ka tirsan Maxkamadda-gaarka ah ee Guryaha Kirada ahaan.

## Yaan la shaqeynaa?

Kiraystayaasha ku nool Toronto Community Housing ee ah:

- waayeeelada (59+) ama dadka wajahaya halisaha, iyo
- kuwa wajahaya guri-ka-saarid kiro aan la bixin darteed.

## Sideen u shaqeynaa?

OCHE waxay la shaqeysaa kiraystayaasha iyo hey'adaha beesha si:

- loo aqoonsado xujooyinka salka u ah ee aay dhici karto in aay keeneen kirada aan la bixin,
- loogala shaqeeyo kiraystayaasha abuuridda xalal lagu gaaro kiraysasho caafimaad leh oo muddo dheer ah oo lagu guuleysto, iyo
- loogu xiro kiraystayaasha hey'adaha beesha si aay u helaan taageero joogto ah.

OCHE sidoo kale waxay u kuur-gelid ku sameysaa in shaqaalaha TCHC aay raaceen habka saxa ah, waxayna soo gudbisaa warbixin tilmaameysa natiijada wax-qabadkeena iyo talooyin loogu talagalay TCHC.



Kooxda OCHE

## Waxyaabo aanan kaa caawini karin:

- bedelka
- dayactir
- xisaabidda kirada
- noocyada kale ee guri-ka-saaridda

Laakiin waad nala soo xiriiri kartaa waxaana kaa caawini doonaa in aan kugu xirno qof ku caawini kara.

## La-kulmida ERO Marka ugu Horeeysa

Sarkaalada Xalinta Waqtiga-hore (ERO), oo hoos ku sawiran, waxay u heelan yihiin in aay la shaqeeyaan kiraystayaasha loo soo diray xafiiskeena.



Haddii lagugu leeyahay kiro oo aad wajaheyo guri-ka-saarid, fadlan adiga waad nala soo xiriiri kartaa, ama xubin qoyska ah, qof kuu doodaya ama hey'ad ku hadlaya magacaaga hanala soo xiriiraan. Haddii aad buuxiso shuruudaha nala faray ERO ayaa kula soo xiriiri doona si loo qabanqaabiyo saacad iyo meel lagu kulmo. Haddii kale, waxaan kugu hagi doonaa qofka saxda ah.

Kulankaaga ugu horeeya, waxaad ka hadli doontaa dhibka kaa heystay bixinta kiradaada iyo sida aan kuu caawini karno. Qeyb ka mid ah habkan aad iskaa uga qeybgaleysid, ERO-ga wuxuu kuu tilmaami doonaa xalalka muddada-dheer ah wuxuuna kugu xiri doonaa taageero dheeraad ah si lagaaga caawiyo in aad heysato guriga kirada kuu ah.

Marka aad la kulmeyso ERO, waxaad keentaa xogta iyo waraaqaha aad heyso ee ku saabsan dhibaatooyinka bixinta kiradaada ee dhowaantan. Haddii aadan hubin, waan kaa caawini karnaa xogta aan u baahanaan doono si aan kuu caawino waxa aay tahay.